

1. Sidee baad ku qaadi kartaa fayraska korona?

Fayraska waxaa laga kala qaadaa qofba qof. Tani waxay dhacdaa, tusaale ahaan, marka aad qufacayso, la hadlayso ama aad gacanta ku salamayso qof.

2. Sideed ku garan kartaa inaad qabto fayraska?

Haddii aad qabtid fayraska korona, waxaa kugu dhacaya, tusaale ahaan, qufac, san duuf leh, cuno xanuun iyo qandho. Wuxuu aad ugu egyahay hargabka. Dadka qaar ayaa sidoo kale ku dhaca shuban. Bukaanka qaar baa si xun u qaada marka loo barbardhigo qaarka kale; waxaa kugu dhacaya dhibaatooyin neefsashada ama oofwareen.

Haddii aad fayraska qabtid, waxay kugu qaadan kartaa 14 maalmood si calaamadahaasi ay kaaga soo muuqdaan.

3. Waa maxay sababta fayraska korona uu u halis u yahay?

Dadka intooda ugu badan, cudurka korona fayraska wuxuu u yahay mid sahlan. Si kastaba ha noqotee, cudurku aad ayuu ugu daran yahay qiyaastii 15 boqolkiiba dadka cudurka ku dhaca: waxay yeelanaayaan dhibaatooyinka neefsashada iyo oof wareenka. Illaa iyo hada, fayrasku wuxuu aasaasiyan dilaa bukaannada waayeelka ah iyo dadka horey u xanuunsanaa.

4. Maxaan sameeyaa haddii aan yeesho calaamadaha jirrada?

Haddii aad qabtid qandho, qufac ama neefta oo kugu adkaata oo aad ku nooshahay meel ay horey u joogeen dad qaba cudurka faayraska, waa inaad wacdaa dhakhtar oo aad la sameysataa ballan.

Dadka qaba qandho, qufac ama neefsashada oo ku adkaata waa inay yareeyaan xiriirka ama taabashada ay la yeelanaayaan dadka kale intii suurtagal ah. Ka fogoow ugu yaraan 1.5 ama 2 mitir dadka kale.

Haddii ay suurtagal tahay, joog gurigaaga ama qolkaaga. Ku qufac ama ku hindhis laabka garabkaaga, ama istiraasho, taas oo aad isla markiiba ku tuuri karto haanta qashinka. U dhaq gacmahaaga had iyo jeer si fiican (gaar ahaan markaad musqusha isticmaasho iyo ka hor intaadan cuntada diyaarin).

5. Maxaan sameeyaa haddii aan xariir la sameeyey qof cudurka qaba?

Haddii aad xiriir shakhsi ahaaneed la samaysay qof qaba cudurka korona fayras, wac dhakhtarkaaga ama [waaxda caafimaadka](#) ee meesha aad deggan tahay oo halkaas ugu sheeg. Khadku wuxuu noqon karaa mid mashquul ah haddii dad badani ay soo wacayaan isla waqtigaas. Haddii ay sidaas tahay, fadlan wac Wasaaradda Caafimaadka ee Federaalka: 030 346 465 100. Talada waxaa lagu bixiyaa oo keliya afka Jarmalka.

Haddii aad ku nooshahay xarunta qaabilaada qaxootiga ama hoy la wadaago, si dhakhso leh ugu wargali maamulka xarunta ama goobta daryeelka. Tusaale ahaan, dugsigaaga, dugsiga luqadda, goobta tababarka shaqada ama goobta shaqada.